# EASY-CARE Tijaabo: Waraaqda Warbixinta Ka Qeyb Qaataha

**Goobta Isbitaaka: Local Site Name**
**Maalgaliyayaasha Tijaabo: Sola Diagnostics.com**
**Deeq-bixiyayaasha: Machadka Qaranka ee Caafimaadka iyo Cilmi Baarista Xanaano**
**Bogga Tijaabada:** www.easy-care.org
**Ama Ku-dhufo QR code-ka waxii warbixin dheeraad ah**


## Ma jeclaan laheyd in aad qeyb ka noqoto tijaabo lagu eegayo baaritaanka cusub ee Kansarka Ilmo Galeenka?

Waxaan jeclaan laheyn in aan kugu casuumno ka qeyb qaadashada cilmi baaris tijaabo. Kahor inta aadan go'aansan waxaan jeclaan laheyn in aad fahanto sababta sahmintan cilmi baaris loo sameynayo iyo waxa ay adiga kaaga dhigan tahay.

**Mid kamida kooxdeena cilmi baaris ayaa kula dulmari doona warqada warbixinta kana jawaabi doono su'aal walbo oo aad qabto.**

**Fadlan waqti qaado oo aqri xogta soo socoto si taxadar leh kalana hadal qoyska iyo saaxibadaa haddii aad rabto.**

Hoos ka eeg sawirka soo gunaanudka xogta ka qeyb qaadasho ee cilmi-baarista XANAANADA-FUDUD.



Waxaa loo baahan karaa baaritaano dheeraad ah si wax badan looga

## Waa maxay ujeedada cilmi baarista?

Kansarka uurgalenka (sidoo kale loo yaqaan kansarka endometrial) waa nuuc kansar ah ee ku badan saameynta xuubka uur galeenka. Calaamadaha ugu waaweyn ee kansarka uur galeenka waa dhiig baxa xubinta taranka ee aan caadiga aheyn. Hase ahaate, kaliya wax yar oo ka mid ah dumarka inta qabto dhiig baxa aan caadiga aheyn ayaa qabo kansarka uur-galenka. Naasiib xumo, waxaa jiro caqabado baarinta kansarka uur-galenka oo in waqti hore la helo. Baaritaanada raajo ee ultrasoundka inta badan ma ahan mid qaas oo ku filan, taaso keeneysa in dumar badan loo diro baaritaano dheeraado ku xadgudba oo aan loo baahneyn.

Baaritaanka WID®-easy waa baaritaan eegaya isbadalo qaas ah oo DNA-ga, ama Deoxyribonucleic Acid, ee dhecaanka laga qaado xubinta taranka. DNA waxa ay wadaa nidaamka hiddo-sidaha jirkeena waana sidii "nashqada" jirdhiskeena. Baaritaanka WID®-easy waxaa loo nashqadeyay in uu dareemo isbadalka qeybaha qaaska ah ee la xiriiro DNA-ga kansarka uur-galenka.

Dhecaanka laga qaado xubinta taranka waxaa loola jeeda isticmaalka dhecaan qaadida suufka ee dareeraha sare ee xubinta taranka iyo mareegta ilmo heysta. Dhecaanki uu qaaday xirfadlaha xaanaano-caafimaad ayadoo isticmaaleyso suuf fudud xiliga baaritaanka jadwalkaaga.

Cilmi baarisyadii hore ayaa muujiyay in baaritaanka WID®-easy uu u fiican yahay si lamid ah raajada ultrasoundka ee helida kansarka uur-galenka uuna hoos u dhigayo tirada dumar ee u baahan baaritaano xadgudub.  Mashruuca cilmi baarista ayuu ujeedkiisu yahay in uu isku barbar dhigo waxqabadka raajada ultrasoundka iyo baaritaanka WID®-easy iyo in uu arruuriyo warbixinta loo baahan yahay si loo taagero soo-bandhigida isticmaal ee baaritaanka WID®-easy guud ahaan NHS. Waxaan sameyn doona cilmi baaris weyn oo 2,000 dumara oo laga soo diray isbitaalka sababto la xiriira dhiig baxa kaadi mareynta aan caadiga aheyn. Waxaa lagaa codsan doona in aad bixiso baaritaanka WID®-easy markaas kadibna waxaad heli doonta baaritaanada iyo xanaanada aad sida caadiga aad hesho.

## Ma qasabaa in aan ka qeyb qaato?

Maya, xor ayaad u tahay in aad go'aan ka gaarto. Waxaan wax kaaga sheegi doona cilmi baarista haddii aad go'aansato in aad ka qeyb qaadato, fadlan heyso warqadan warbixinta. Haddii aad go'aansato in aad ka qeyb qaadato haddane aad badasho niyadaada, waad ka bixi kartaa waqti kasta adiga oo aan wax sharaxaad ah ak bixinin. Tani ma saameyn doonto heerka xanaano caafimaad ee aad hesho.

Waqti kasta waad ka bixi kartaa adigoo fariin iimeyl usoo diraya (Site PI – localised email to be added). Haddii dhecaankagi baaritaan aanan wali laga shaqeynin, waxaa lagu burburin doona sheybaarka. Haddii ay dhacdo in laga shaqeyay, wax walbo kasoo haray oo keydka ku jira ayaa la burburin doona.

Inta lagu jiro cilmi baaristan, waxaa suurto gal ah in ay soo baxdo warbixin cusub oo ku saabsan baaritanka. Haddii ay tani dhacdo, waan kula soo xiriiri doona waxaadna heli doonta fursad aad su'aallo kaga weydiiso misna kaga doodo walaacaga xubin kamida kooxda cilmi baarista. Haddii aad go'aansato in aadan sii wadin, go'aankaaga waa la xushmeyn doona mana saameyn doono xanaanada aad hesho.

## Maxaa igu dhici doono haddii aan ka qeyb qaato?

Waxaa laguugu casuumi doona in aad ka qeyb qaadato tijaabo cilmi-baaris marka xarunta caafimaadka soo booqato. Haddii aad rabto in aad wax badan ka ogaato tijaabadan, waxaa laguu sharaxi karaa marka aad balanta leedahay. Waxaa lagu siin doona fursada in aad su'aallo ka weydiiso. Haddii aad rabto in aad ka qeyb qaadato, waxaa lagu weydiin doona in aad saxiixdo foomka ogolaanshaha.

Waxaan u baahan doona in aan kaa qaadno dhecaan baaritaan. Tani waxa ay noqon doonta dhecaanka laga qaado xubinta taranka ee suuf mariska oo uu qaadi doono dhaqtarka sameynayo baaritaankaga ilmo heysta (pelvic). Ayadoo la raacayo baaritaanka, waxaad sidoo kale lahaan doonta balantaada sida caadiga ah.

Haddii aad doorato in aad ka qeyb qaadato cilmi-baaristan, waxaad u baahan doonta 15 ilaa 20 daqiiqo dheeraad ah inta aad joogto xaruntaada caafimaad ee balanta ku leedahay. Waxaad sidoo kale intaa kadib sii wadan doonta jadwaalka balanta caadiga ah, Dhaqtarkaaga ayaa kusiin doono tallooyinka ku saabsan baaritaanada kale ama habraacyada

kale ee ay moodaan in aad u baahan tahay marka loo eego adiga baahidaada ku saleysan natiijada raajada ultrasound-ka.

Dhecaanka lagaa qaaday ayaa la baari doona balantaada xarunta caafimaad kadib. Haddii natiijada baaritaanka dheecanka uu noqdo mid bositif ah, waa lagula soo xiriiri doona waxaana laguu sheegi doona in aad soo laabato si aad u marto baaritaanka ilmo-galeenka (hysteroscopy) inta aad ku jirto balantaada labaad, taaso ugu yaraan qaadaneysa 30 daqiiqo. Kani waa baaritaan kaamiro lagu eegayo gudaha ilmo galeenka laguna qaadayo cadyar oo kamida jirka (biopsy). Waxaa suurto gal ah in mar horeba lagula taliyay qaadida cadyar oo kamida jirka (biopsy) ama baaritaanka ilmo-galeenka (hysteroscopy) sida ku saleysan natiijooyinka raajada ultrasoundka ee la sameyay kulanka balantii hore. Haddii tani aya jirto, looma baahno baaritaano kale ee ku saleysan baaritaanka WID®-easy ee halista badan. Kaliya tiro yar oo dumar ah ayaa qaba baaritaanka dhecaan ee WID®-easy, ayaga ayaana laga codsan doona in ay usoo laabtaan baaritaano loo sheegay in aysan muhiim aheyn marka loo eego natiijada raajada ultrasoundka.

Haddii ay tani jirto, waxaa lagugula talin doona in aad sameyso baaritaanka ilmo-galeenka (hysteroscopy) iyo iska qaadida cadyar oo kamida jirka (biopsy) adigoo qaba kabaabisada suuxdinta si markaa loo qaadi karo cadyar oo kamida jirka (biopsy) oo ah midka ugu haboon. Haddii ay jirtay sabab caafimaad oo aan laguu siin karin kabaabisada suuxdin, ama aad jeceshahay in aadan qaadanin, waxaa lagu siin doona fursada in aad ku sameyso baaritaanada dawada daremo-dilka xanuun (sedation) (ma ahan mid aad miyir beeleyso gabi ahaan) ama adigoo cirbad uga qaadanaya dhabarka si loo hubsado in aadan waxba dareemi karin inta qaliinka lagu jiro. Tani si buuxdo ayee dhaqaatiirta ku xanaaneyneso kaala hadli doonta, waxa ayna noqon doonta adiga dooqaaga haddii aad sameyneyso baaritaanada dheeriga ah iyo nuuca kabaabisada aad qaadaneyso.

Marmarka qaar, baaritaanada WID®-easy ayaa sheegi kari ay aysan gunaanud laheyn. Haddii baaritaankaga dhecaan qaadin lasoo gunaanudi karin, waxaan dib kugu casuumeyna in aad ku celiso baaritaanka.

Marnaba ma ahan in aad wax lacag ah ka bixiso cilmi baaristan. Habraacyada cilmi-baarista (sida qaadida dheecanada baaritaan) waxaa laguugu siinaya si bilaash ah. Waxaad heli doonta kaar £20 ah mar walbo oo aad booqasho dheeri ah oo jadwalkaaga ku jirin utimaado.

Xogtaada caafimaad waxaa tixraaci doono kooxda sheybaarka oo qeyb ka ah kooxda tijaabada cilmi baaristan. Xogta jadwalka xarunta caafimaad ee loogu baahan yahay balantaada NHS waxaa aruurin doono kooxdan ayagoo sidoo kale ku weydiin doono xooga su'aallo dheeri ah oo qeyb ka ah baaritaaanka cilmi baaristan. Waqtiga diwaangelinta tijaabada, waxyaabaha qofka lagu garan karo sida magaca, taarikhda dhalashadda iyo isbitaal nambarka ayaa laga saari doona, waxaana laguu sameyn doona nambar gooni ah oo laguugu garto.  Xogta kula xiriirta ee cilmi baarista ayaa lagelin doona keyd-xog amaan ah, suurta galna ma noqon doonto in adiga lagaa soo dhex saaro xogta cilmi baarista loo aruuriyay.

Sheybaarka cudurada (pathology) waa laab ay aqoonsan tahay NHS taaso ka dhigan in ay si joogto ah u baaraan dheecanada isbitaallada. Shaqaallaha baaraya dheecaankaga ayaa arki kara xogtaada shaqsi (Magaca & Taariikhda dhalashadda & Isbitaal nambarka) si ay u maareyaan natiijadaada. Shaqaallaha laabka ma arki karaan xogta-keydka cilmi baarista ama warbixinta ku jirto.

Waxaan keydin doona xogta natiijada raajadaada, sidoo kale natiijooyinka kasoo baxa baaritaanada dheeriga ah ee laga yaabo in aad sameyso sida cadyar oo kamida jirka (biopsy) ama baaritaanka kaamirada (hysteroscopy).

Waxaan ka uruurin doona xog dheraad ah xogtaada caafimaadka 3 ilaa 12 bilood uruurinta xogta natiijada soo baxdo. Waxaan sidoo kale isticmaali doona xogta Adeega Qiimeynta Diwaangelinta Kansarka ee Qaranka (National Cancer Registration Analysis Service - NCRAS) sidii hab kale aan ku eegeyno haddii lagaa baaray kansar 12 bilood ka dib marka aad ka qeyb qaadato cilmi baarista.

## Warcelinta Iskaaga ee Dheeraadka

Waxaan sidoo kale ku weydiin karnaa in aad sameyso foom su'aallo gaaban oo ku saabsan qibradaada iyo sidoo kale fikirkaaga iyo aragtidaada ku saabsan waxtarka dhecaanka laga qaado xubinta taranka sidii baaritaanka kansarka ee mustaqbalka.

Waxaa sidoo kale jiri doono fursad aad ku bixiso wareysi 1:1 qof oo warcelina aad la yeelan doonto dadka la shaqeyo cilimi-baarayaashena ee tijaabadan waxa ayna ka tirsan yihiin saaxiibada shaqo ee Jaamacada Kuleejka London (UCL). Saaxiibada shaqo UCL waxa ay

qibrad u leeyihiin sameynta cilmi-baaris ay ku aruurinayaan misna ku qiimeynayaan xogta warcelinta ka qeyb qaatayaasha iyo qibraadooda.

Warbixin gooniya oo dheerad ah waxaa ku siin doono kooxda cilmi baarista haddii aad daneyneyso in aad ka qeyb qaadato wareysiyada.

## Maxaa dhacayo haddii aan doorto in aan ka qeyb qaadan?

Sida caadiga ah, tijaaboyinka caadiga ayaa la sameyn doona si kaste ahaato, xanaanadaadana ma saameyn doonto.

## Maxaa kamida faa'iidoyinka ka qeyb qaadasho?

Faa'iidada tooska ee ka qeyb qaadashada cimi baaristan waa in baaritaanka WID®-easy uu leeyahay fursad badan oo uu ku dareemo kansarka uur-galenka kaas oo uusan soo qaban karin raajada ultrasoundka, kaas oo ah baaritaanka caadiga ah hadda ee lagu eego dhiig baxa aan caadiga aheyn.
Haddii guul laga gaaro, mashruuca ayaa keeni kara siyaabo badan oo aan xadgudub aheyn ee lagu dareemi karo kansarka uur-galenka halkaas oo ay dumar badan u baahan doonin in ay maraan baaritaano xadgudub ah ee dhamaan NHS.

## Maxaa ka mida qasaaroyinka macquulka iyo halista ka qeyb qaadashada?

Marka uu dhaqtarku qaado dhecaanka baaritaanka WID®-easy, waxaad dareemi kartaa jawi-qas lamida midka baaritaanka xoqi taanka ilmo heysta. Ma jirto wax halis kale ah ee baaritaanka WID®-easy, hase ahaate, waxaa jiri karo in badan oo aad u yar suurta gal halisyo aan la fileynin oo dhici karo, maadama ay cilmi baaristan ay tahay baaritan cusub. Haddii warbixin cusub oo ku saabsan halisaha ku saabsan ay soo baxaan, sida ugu dhaqsiyaha badan ayaa laguugu soo wergelin doona.

Haddii baaritaanka WID®-easy uu muujiyo natiijo halis sare ah, ama haddii baaritaanka raajada ultrasoundku noqdo mid aan caadi aheyn, markaas kadib baaritaano dheeraad ah ayaa lagu talin karaa, waxa ayna lahaan karaan halisyo u gooni ah. Natiijo baaritaan WID®-easy halis sare ah waxa ay ka dhigan tahay in ay jirto suurta galka kansar. Kooxda

caafimaadka ayaa kaala hadli doono waxa ay tani kaaga dhigan tahay haddii natiijada baaritaanka kusoo noqdo halis sare.

Baaritaan walbo, oo uu ku jiro baaritaanka raajada ultrasound-ka kaas oo hadda ah baaritaanka xanaanada caadiga ah, waxaa jiro halis yar ee suurta galnimada in natiijadu been noqoto. Haddii aad hesho natiijo negatif been abuura, waxaan fileyna in ay sii jiri doonan caalamadaha iyo in aad kusoo noqoto xarunta caafimaadka si baaritaan dib-u-qiimeyn laguugu sameyo.
Haddii ay kuuso baxdo natiijo sax been ah, waxaad mari doonta baaritaano dheeriya oo lagu ogaanayo haddii aad qabto kansar.

## Maxaa ku dhacaya dheecaanka leyga qaado aniga?

dhecaanka laga qaado xubinta taranka waxaa loo diri doona sheybaarka cudurada (pathology) NHS si loo baaro ayadoo la isticmaalayo baaritaanka WID®-easy kaas oo raadinaya isbadallada gaarka ee hidasidaha DNA-ga. Tani waxaa la sameyn doona ayadoo la isticmaalayo farsamooyin lagu eegayo haddii qeybo kamida hidasidaha DNA-ga ay noqoto mid aktif ah. Dheecaanka la qaaday waxaa loo diri doona Sheybaarka Adeega Caafimaadka (HSL) si loo qiimeyo.

Dhamaadka tijaabada, haddii aad u ogolaato, inta kasoo harta agabka hidasidaha DNA-ga suufka dhecaankaga ayaa lagu keydin doona si la ogaan karin qofka si loogu isticmaalo cilmi baaris mustaqbalka, ee saaxiibada shaqo ee cilmi baarista UK & EU. Saaxiibada shaqo ee cilmi baarista ayaa saxiixa heshiisyo nagala dhaxeyo kuwaas oo muujinaya misna xadidaya sida ay u isticmaali karaan xogtaada. Waxaa u baahanahay in saaxiibada shaqo ee cilmi baarista ay leeyihiin tallaaboyin amniga iyo sirta shaqsiga oo aan anaga hubsano kahor inta aanan la wadaagin tusaalayaasha baaritaan. Guddigeena Helitaanka Dheecada Baaritaan iyo Xogta ayaa qiimeya codsiyadan, waxa ayna kaliya ansaxiyaan marka ay si adag u qiimeyaan soo jeedinta isticmaal ee cilmi baarista. Intaas waxaa dheer, waa in ay maraan codsi gooniya oo edabta cilmi baarista oo ah soo jeedinta cilmi baaristooda.

Guddigeena Helitaanka Dheecada Baaritaan iyo Xogta ma ansaxin doonan mana usii deyn donaan isticmaalka mustaqbal ee tusaaloyinka keydsan waxii cilmi baaris ah ee leh haslita in lagu garto ama halis cuduro ku keeni kara qaraabadaada.

Haddii aad badasho maskaxdaada waqti kasta oo ku saabsan keydka waqtiga dheer ee cilmi baaristan, fadlan lasoo xiriir: trial@sola-diagnostics.com.

Wali waad ka qeyb qaadan kartaa tijaabada adiga oo aan ogolaaneynin in mustaqbalka la isticmaalo waxa kasoo hara dheecaanka baaritaanka.

Haddii aadan ogolaan in waxa kasoo hara dhecaanka baaritaankaga la keydiyo, waa la burburin doona isla markiiba marka uu dhamaado baaritaanka sheybaarka.

## Mala ogeysiin doona GP-geyga in aan ka qeyb qaatay cilmi baaristan?

Haddii aad adiga fasaxdo, waxaan wargelin doona G.P-gaaga haddii aad ka qeyb qaadato cilmi baaristan. Natiijada baaritaanka ayaa lala wadaagi doona G.P-gaaga sidii qeyb kamida nidaamka xanaanada.

Waxaad la haan doona fursad aad ku eegto natiijada baaritaankaga, haddii aad doorato, waxaad ka dhex arki doonta appka adeega caafimad bixiyahaaga, haddii bogga isbitaalku leeyahay appka nuucan ah. Kooxda xarunta caafimaadka ayaa si toos ah wax kuugu soo qori doono natiijooyinka baaritaankaaga WID®-easy.

## Kawaran haddii aan qabo su'aal ama dhib i heysto?

Haddii ay jiraan wax yaabo ku saabsan cilmi baarista oo aadan hubin, fadlan weydii qof kamida kooxda xanaano ee cilmi baarista isbitaalka ama la hadal si toos ah cilmi baarayaasha (Local PI email, Phone number to be added).

Haddii aadan ku faraxsaneyn qeyb kamida cilmi baarista misna aad rabto in aad ka cabato waxaad kusoo gudbin kartaa cabashadaada nidaamka NHS. Isbitaalkaaga ayaa awoodi doono in uu ku siiyo warbixin ee ku saabsan arrintan. Waxaad sidoo kale lasoo xiriiri kartaa Adeega Lashaqeynta iyo Tallada Bukaanka (PALS) ee madaxa banaan ee isbitaalkaga. (Site to add local PALS telephone number). Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa dhaqtarka isbitaalka u jooga ee ka masuulka cilmi baarista: Add Local Site PI email

Ma fileyno wax dhibaato ah laakiin haddii ay wax halaaban, iyo haddii aad ay dhibaato kusoo gaarto inta cilmi baarista lagu jiro sababtoo ah qof ku dayacay, waxaad yeelan kartaa magdhaw tallaabo sharci ka dhan ah maalgaliyaha (Sola Diagnostics), inkasta oo ay suurta gal tahay in aad iska bixiso lacagta sharciga. Nidaamka cabashooyinka caadiga ee NHS ayaa ahaan doona mid aad wali heli karto.

Haddii dhibaateyntu aysan aheyn dayacaad qof (tusaale, saameyn aan la fileynin), waxaad wali heli doonta xanaanada daweyn ee ku haboon iyo daweynta NHS.

## Maxaa ku dhici doono natiijada cilmi baaristan?

Marka ay tijaabadu dhamaato, natiijada ayaa lagusoo daabici doona joornaalka seyniska. Haddii natiijadu tahay mid weyn, waxaa suurto gal ah in idaacadaha laga soo daayo. Haddii baaritaanku noqdo mid wax ku ool ah kuna haboon isticmaalka guud, waxaa suurto gal ah in ay qataan dhamaan NHS si loogu horumariyo baaritaanka kansarka uur-galenka.

## Sideen u isticmaali doona xogta adiga kugu saabsan?

Waxaan u baahan doona in aan u isticmaalno xogta caafimaad ee adiga ku quseysa ee ku jirta diwaanka dijitaalka NHS ee cilmi baaristan.

Xogtan waxaa ka mid noqon doono:

- Erayda ugu horeyo magacaaga
- NHS namber
- Magacaga
- Halka lagala xiriiri karo

Dadka ayaa u isticmaali doono in ay xogtaan ku sameyaan cilmi baarista ama ku hubiyaan xogta si loo ogoaado in cilmi baaristan sida saxda ah loo sameyay.
Dadka aan u baahneyn in ay ogaadan qofka aad tahay awood uma yelaan donaan in ay arkaan magacaaga ama halka lagala xiriiri karo. Xogtaada waxa ay taa badalkeed lahaan doonta nambar sireed.

SolaDiagnotics UK ayaa ah maalgaliyaha cilmi baaristan.

SolaDiagnotics UK waxa ay masuul tahay ilaalinta xogtaada. Waxaan la wadaagi doona xogtaada ku saabsan cilmi baarista mashruucan hayadahan soo socda:

- NHS Sheybaarka Cudurada (pathology) - si ay u baaran dhecaankaga
- UCL Patners - saaxiibada shaqo ee ka shaqeynaya foomka su'aallaha ka qeyb qaatayaasha & 1:1 wareysiyada ah.
- Lindus Health - hayada heshiiska lagula galay in ay sameyso keydka cilmi-baarista oo naga caawin doonta lasocoshada kormeer ee tijaabada, si loo hubsado in tijaabadu loo sameynayo sida ugu haboon.

Adeega Qiimeynta iyo Diwaangelinta Kansarka ee Qaranka - si ay u aruuriso xogta kasoo baxda 12 ki bilood, kooxda ayaa ku xiriirin doona xogtaada diwaanka.

Waxaan ka dhigi doona dhamaan xogta kugu saabsan mid amaan ah anagoo:

- Ku keydin doono xogta cilmi baarista ayada oo aysan ku jirin wax lagu garan karo xogta shaqsi ee keydka dijitalka amaana oo tayo heer sare ee amaanka tiknolajiyada leh.
- Dhamaan shaqaallaha ku lugta leh cilmi baarista (kooxda sheybaarka iyo kooxda xarunta caafimaad) ayaa heli doona tobabar sida looga dhigo xogtaada mid aan lagugu garan karin, iyo sida loogu shaqeyo heerka caalami ee ku haaboon Maareynta Xogta sida waafaqsan machadyada NHS.

**Isku xawilida caalamiga**

Waxaa suurto gal ah in aan la wadaagno ama aan siino awood isticmaal xogta kugu saabsan cilmi baarayaal ka baxsan UK siyaabo la xiriira sababahan:

- Xogta ayaa suurto gal ah in lala wadaago cilmi baarayaasha nala shaqeya ee caawin ka geysta baaritaanada hadda la sameyay.
- Wadaagida xogtan waxaa fududeyn doona aqoonta guud ee cilmi baarista caafimaadka dumarka.

Tani haddii ay dhacdo, waxaan la wadaagi doona oo kaliya xogta loo baahan yahay. Waxaan sidoo kale ku dadaali doona in aan laagaa dhex garan karin xogta la wadaagayo sida ugu macquulsan. Tani suurta gal ma noqon karto shuruudo marxalado gaar ah awgeed - tusaale ahaan, haddii aad leedahay cudur dhif ah, waxaa suurto al ah in lagu garto adiga. Haddii xogtaada lala wadaago dibada UK, waxa ay noqon doonta cida lala wadaago mid kamida hayadaha nuucan soo socda:

- Cilmi baarayaasha kale ee la shaqeya UK & EU, waxaa kamid noqon kara machadyada akademiyada iyo saaxiibada shaqo ganacsi.

Waxaan ku daaleyna hubinta in xogtaada ay tahay mid dhowran. Qof walbo oo heli kara xogtaada dibada UK waa in uu sameyay waxa aan u sheegno si xogtaada ay leedahay heer lamida midka ilaalo ee shariciga UK. Waxaan ku dadaaleyna hubinta in xogtaada ay tahay mid ku amaan ah dibada UK ayadoo la sameynayo sidan soo socota:

- Qaar kamida wadamada lala wadaagi doono xogtaada ayaa leh go'aamo ku filan oo jira. Tani micnaheedu waa in aan naqaano sharciyadooda in ay leeyihiin heerka ilaalinta xogta ee sharicga ilaalinta UK.

- Waxaan isticmaalna heshiisyo qaas ah ee loo ansaxiyay in lagu isticmaalo UK kuwaas oo siinaya xogta shaqsi heer ilaalo lamid ah midka ay UK leedahay. Waxii warbixin dheraad ah booqo bogga internetka ee Xafiiska Gudoomiyaha Warbixinta (ICO): https://ico.org.uk/for-organisations/uk-gdpr-guidance-and-resources/international-transfers/
- Waxaan u baahanahay hayadaha kale in ay leeyihiin talaaboyin amni ku haboon ilaalinta xogta oo waafaqsan amniga xogta iyo shuruucda ilaalita sirta ee aan leenahay. Tani waxaa kamid ah lahaanshaha tallaaboyin ilaalo lagaga dhowrayo xogtaada shil lumin iyo isticmaal aan la idmin, isticaal, badal lagu sameyo ama in la wadaago

**Halkee ka ogaan kartaa wax badan oo ku saabsan sida xogtaada loo isticmaalo?**

Waxaad ka ogaan kartaa sida xogtaada aan isticmaalno, oo ay ku jirto nidaamka seyniska aan isticmaalno marka aan ku xawileyno xogtaada shaqsi dibada UK:

- warqadeena sharaxaada. Warbixin dheeraad ah waxaa laga heli karaa **www.hra.nhs.uk/patientdataandresearch**
- adiga oo weydiinaya mid kamida kooxda cilmi baarista
- adigoo u soo diraya fariin imeyl Sola Diagnostics: trial@sola-diagnostics.com

## Sida aan u isticmaali doono xogta adiga kugu saabsan marka tijaabadu dhamaato?

Marka aan dhameyno cilmi baarista, waxaan heysan doona qaar kamida xogta si aan awood ugu yeelanayo in aan natiijada fiirin karno. Waxaan u qori doona ribootkeena warbixin si uusan qofka ku fahmi karin in aad adiga ka qeyb qaadatay sahmintan Waxaan xogtaada cilmi baarista heyn doona ugu badnaan 15 sanno. Xogta cilmi baarista ayaan gabi ahaan markaa masaxi doona si amaan ah.

## Yaa maal galinaya, sameynaya iyo hubinaya cilmi baarista?

Cilmi baarista waxaa maal galinaya Machadka Qaranka ee Caafimaadka iyo Cilmi Baarista Xanaano (NIHR). Waxaa dib u eegis ku samayay misna ansaxiyay Guddiga Anshaxa Cilmi Baarista South Cambridge.

Maal galinaya (Sola Diagnostics) ayaa sharciyan ka masuul ah hubinta in cilmi baarista si haboon loo qorsheyay, qabtay, loogana warbixiyay.
Wakiilka Maalgaliyaha ayaa matalaya Maalgaliyaha waxa uuna masuul ka yahay kor joogteynta maamulka maalinlaha ee cilmi baarista, hubinta badbaadada ka qeyb qaatayaasha, sirta shaqsi, iyo daryeelka in la dhowro ayada la hubinayo in cilmi baaristu u socoto sida ku haboon anshaxa, seyniska, iyo shuruudaha sharciga.

- If you have questions about how the study is managed or who is responsible for ensuring it runs safely and correctly, you can contact the Sponsor Representative: Dr Sara Sleigh , trial@sola-diagnostics.com)

Taa badalkeed, waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa dhaqtarka ka masuulka ah tijaabadan ee isbitaalka deegaankaga:

Waxii su'aallo ku saabsan cilmi baarista fadlan la xiriir: (Local Site Details)

Dr Email: Telephone:

---

*Waad ku mahadsan tahay aqrinta Warqada Warbixintan iyo tixgelinta ka qeyb qaadasho*

---